

XEERKA U QALANKA KAALMADA DHAQAALE OO LUUQAD CAD LAGU SOO KOOBAY

YAA DALBAN KARA:

Xeerka U Qalanka Kaalmada Dhaqaale waxa uu siiyaa daryeel bilaash ah dadka isku dayay dhamaan ikhtiyaarada bixinta lacagta ee kale, iyo

- Kuwa leh dakhliga qoyska ee ah ama ka hooseeya 250% sanadkan Tilmaamaha Saboolnimada Federalka.
- Kuwa soo gudbiyey arjiga loo buuxiyay sida saxda ah ee kaalmada dhaqaale.
- Hadii aad u qalanto kaalmada dhaqaale, lagaama qaadi doono wax ka badan xadiga guud ee la iskugu soo dalaco daryeelka xaalada degdega ah ama caafimaad ahaan daruuriga ah.

Kaalmada dhaqaale ee masiibada ayaa sidoo kale aad heli kartaa hadii ay kugu dhacdo xaalada caafimaad iyo dhaqaale oo aad u daran.

SIDA LOO CODSADO:

SPECTRUM HEALTH:

- Isaga oo qofku socda ayuu booqanayaa miiska macluumaadka, waaxda xaalada degdega ah ama xafiiska duwaanka galinta ee isbitaalka Spectrum Health, oo ay ku jiraan xarunta guud, oo ku taala 100 Michigan, Grand Rapids, MI 49503
- Boosta ugu dir: Spectrum Health Butterworth Hospital Financial Counseling Office, 100 Michigan, Grand Rapids, MI 49503
- La hadal: 1.844.838.3115
- Adigoo booqanaya: <http://www.spectrumhealth.org/financialassistance>
- limeel ugu diraya La-taliye Dhaqaale: FinancialCounseling@spectrumhealth.org

SPECTRUM HEALTH LAKELAND:

- Adiga oo socda qabo miiska macluumaadka, waaxda xaalada degdega ama xafiiska isduwaan gelinta ee wax kamid ah isbitaalada Spectrum Health Lakeland, oo uu kamid tahay xarunta guud ee ku taala 1234 Napier Avenue, St. Joseph, MI 49085
- Boosta ugu dir: Spectrum Health Lakeland, PO Box 410, St Joseph, MI 49085
- La hadal: 1.844.408.4103, ikhtiyaarka 1
- Adigoo booqanaya: <https://www.spectrumhealthlakeland.org/patient-visitor-guide/patient/billing/financial-assistance>
- limeel ugu diraya La-taliye Dhaqaale: SHLfinancialcounseling@spectrumhealth.org

WIXII NUQULO BILAASH AH EE XEERKA IYO ARJIGA:

- Isticmaal macluumaadka xidhiidhka ee sare.
- Turjubaada xeerka, guudmarkan iyo arjiga waxaa lagu heli karaa luuqado kale marka la dalbado ama iyada oo la booqanayo websaytka ku yaal korka.

KAALMADA WAXAA LAGA HELI KARAA:

La-taliyayaal & U Ololeeyayaal Dhaqaale ayaad heli kartaa si ay kaaga caawiyaan buuxinta arjiga kaalmada dhaqaale. Waxa lagula xidhiidhi karaa iyada oo loola hadlayo ama loola xidhiidhaya sida lagu sheegey qaybta "Sida Loo Dalbanayo". Waxay sidoo kale kaa caawin karaan inaad isku duwaan geliso caymiska barnaamijyada Health Insurance Exchange ama Medicaid-ta Gobolka Michigan.